

**Decree of the Minister of Commerce** dated 17 September 2007 confirming that:

1. All traders importing or exporting commercial goods must possess a valid Import & Export Permit issued by the Ministry.
2. Applicants for permits must be registered with the Chamber of Commerce which shall forward the applications to the Ministry. The necessary information in the applications is set out in the decree.
3. The decree does not affect the goods in the possession of Somaliland expatriate families and those owned by international organisations, goods meant for aid and assistance, goods belonging to Waqf endowments and goods in transit to other countries.
4. Exporters of essential foodstuffs needed within the country must have an export licence.

[www.somalilandlaw.com](http://www.somalilandlaw.com)

---

**Ministerial Decree: 17/09/07**  
**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**Wasiirka Wasaarada Ganacsigu**

Markii uu arkay: distoorka JSL Qodobkiisa 11-aad,12-aad iyo 14-aad;

Markuu arkay: Sharciga (Commercial Law) qodobkiisa 11-aad , 13-aad, 16-aad iyo 14-aad;

Markuu arkay : Qodobka 1-aad xarafka 5-aad,6-aad iyo 7-aad ee qaab dhismeedka iyo waajibaadka wasaarada ganacsiga;

Markuu darsay: sababta keentay kala go'a badeecadaha iyo sicir bararka qutul daruuriga;

Markuu la tashaday: Rugta Ganacsiga JSL, waxgarad badan iyo aqoonyahano;

Wuxuu soo saaray xeerkan:-

**Qodobka 1-aad**

A. Ganacsade kasta oo doonaya inuu dalka keeno ama ka dhoofiyo badeecad ganacsi waa inuu marka hore ruqsada keenista iyo dhoofinta uga qaataa wasaarada ganacsiga (Import and Export Permit).

B. Waxa shardi ah ganacsadaha wax soo dejinaya ama dhoofinaya inuu leeyahay liisan ganacsi oo shaqaynaya (Valid License).

C. Ganacsadaha soo dalbanaya ruqsada waxa laga raba shuruudahan:-

- inuu uu ka duuwaan gashan yahay rugta Ganacsiga JSL dalabkiisana u soo qoraa wasaarada ganacsiga isla markaana soo mariyaa rugta ganacsigu oo u soo gudbinayso wasaarada ganacsiga oo leh ogolanshaha kama dambaysta ah ee bixinta ruqsada.

D. dalabkiisu waa in uu ka koobnaadaa:

1. Nooca Badeecada
2. Tirada Badeecada
3. Qiima sheegta badeecadda
4. Meesha uu ka keenayo
5. Mudada uu ku keenayo
6. Meesha uu ka soo dejinayo

#### **Qodobka 2-aad**

Sida ku cad sharciga Maaliyada qodobkiisa 20-aad waxaa ka reeban xeerkan badeecadaha ay sitaan qoysaska iyo dadka qurba jooga ah, hay'adaha caalamiga ah , Macaawinooyinka iyo alaabta awqaafta.

#### **Qodobka 3-aad**

Ganacsadaha badeecadaha daruuriga ah dalka ka saaraya waxaa uu isaguna qaadanayaa ruqsada dib u dhoofinta , dalkana kama saari karo badeecadaha quuto daruuriga ah sida Bariiska, Baastada, Sonkorta, Saliida Cuntada, Daqiiqda, Caanaha, Timirta iyo Qamandida.

#### **Qodobka 4-aad**

Badeecadaha dhaxdinta ah (Transit Trade) ee Nidaamka dhexdinta soo mara LC Gooda iyo Bil Of Loading-ka ku cad yahay ee u gudbaya dalalka aynu jaarka nahay wax saamayna kuma yeelanayo xeerkani.

#### **Qodobka 6-aad**

A. Xeerkan qaybtiisa soo dejintu waxay ku dhaqan galaysaa Muddo saddex Bilood ah , taas oo loogu tallo galay dalabaadada maqan mudada ay ku soo gaadhi karaan dalka.  
B. Qaybta dib u dhoofinta Rashiinada daruuriga ah (Re Export Essential Goods) waxay dhaqan galaysaa maalinta la saxeexo xeerkan.

#### **Qodobka 7-aad**

Xeerkan cida ku dhaqmi wayda waxa laga qaadi doonaa tallaabo sharci ah oo waafaqsan shuruucda ganacsiga iyo maaliyada.

**Cismaan Qaasim Qodax**  
**Wasiirka Ganacsiga Somaliland**